

# Victorian Seniors Card



Kani waa Seniors Card, wuxuuna leeyahay faa'iidooyin iyo qiimo dhimis badan.

Ujeedada Seniors Card waa in lagu dhiirigaliyo dadka da'da ah in ay sii wadaan firfircoonda oo ay bulshada ka mid ahaadaan, taas oo raqiis uga dhigaysa waayeelka inay dibbada u baxaan.

Si aad xaq ugu yeelato Seniors Card-ka Victoria waa inaad jirtaa 60 sano ama ka weyn, laakiin waad codsan kartaa kaarka ilaa afar toddobaad ka hor intaadan gaadhin 60.

Waa inaad tahay degane rasmi ah oo Australia degan kagana sii nool Victoria.

## Waxaa jira laba kaar oo kala duwan

- Haddii aad shaqeyso in ka yar 35 saacadood todobaadkii waxaad codsan kartaa Seniors Card.
- Haddii aad shaqeyso 35 saacadood todobaadkii ama ka badan waxaad codsan kartaa Seniors Business Discount card.

Si aad online uga codsato waxaad u baahan doontaa inaad haysato Medicare-ka.

Waxay qaadanaysaa shan daqiqo oo Seniors Card waa bilaash.

Foomamka codsiga waxaa sidoo kale laga heli karaa matabadda xaafaddaada, waxayna kaa caawin karaan foomka internetka.



Dadka haysta Seniors Card-ka iyo Seniors Business Discount Card-ka waxay ka faa'iidayسان karaan qiimo dhimista alaabta iyo adeegyada kumanaanka Seniors Card business.

Dadka haysta Seniors Card - Seniors myki Card oo lacag la'aan ah ayaad helaysaa markaad ku biirto barnaamijka iyo waliba qiimo dhimis gaadiidka dadweynaha ah.

## Faa'iidooyinka waxaa ka mid ah:

- Qiimo dhimis kumanaan ganaci oo ay ku jiraan maqaayadaha
- Qiimo dhimis meelo badan oo soo jiidasho leh sida Beerta Xayawaanka ee Melbourne.
- Dhimista gelitaanka madxfafka.
- Qiimo dhimista tigidhada filimada.

Raadi calaamadda 'Seniors Card Welcome Here' ama weydii qiimo dhimista Seniors Card marka aad dibadda ku sugar tahay.

Ka dalbo online-ka si ay maanta kuugu bilaabato helitaanka faa'iidooyinka Seniors Card.

**[www.seniorsonline.vic.gov.au](http://www.seniorsonline.vic.gov.au)**

